

Kooxda Daryeelkaaga— Family Care iyo Partnership

(Your Care Team—Family Care and Partnership)



Markii aad ku soo biirtid barnaamijka daryeelka muddada dheer, shaqaalaha barnaamijka (ee loo yaqaan kooxda daryeelka) ayaa kula shaqeynayo. Waxay wax ka bartaan baahiyahaaga iyo qorsheynta adeegyada lagu taageero baahiyahaas.

Barnaamij walba wuxuu u baahanyahay dadka qaar inay ku jiraan kooxda daryeelkaaga. Waxaad sidoo kale leedahay iqtiyaarka ku saabsan dadka kale ee lagu darayo. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa inaad rabtid inaad yeelatid shaqaalaha daryeelka gaarka ah ama saaxib ama xubin qoys sida ka qeyb ah kooxda daryeelkaaga.

Ogow: Haddii aad leedahay qof kuu gaaro go'aamada daryeelka caafimaadka ama maaliyada, waxay ku jirayaan kooxda daryeelkaaga.

Family Care

Kooxda daryeelkaaga waxaa ka mid ah:

- Adiga.
- Maareeye daryeel.
- Kalkaalso diiwaangashan.
- Xubin qoyska ah ama qof qaraabo ah (*iqtiyaar*).
- Xirfadlayaasha kale, waxay ku xirantahay baahiyahaaga, sida shaqaalaha daryeelka gaarka ah (*iqtiyaar*).

Partnership

Kooxda daryeelkaaga waxaa ka mid ah:

- Adiga.
- Dhaqtar.
- Kaalso dhaqtar.
- Maareeye daryeel.
- Kalkaalso diiwaangashan.
- Xubin qoyska ah ama qof qaraabo ah (*iqtiyaar*).
- Xirfadlayaasha kale, waxay ku xirantahay baahiyahaaga, sida shaqaalaha daryeelka gaarka ah (*iqtiyaar*).

